

# ALLINA MEDICAL LABORATORIES - STOOL COLLECTION INSTRUCTIONS

ALLINA MEDICAL LABORATORIES -  
FARIIMAHA URURINTA SAXARADA

Somali



1. **Shaybaadhka/Labaratooriga:** Goobo ama wareeg gali baadhitaanka la amray
2. **Bukaanka:**
  - Ku qor magacaaga, taariikhda iyo wakhtiga ururinta weel kasta.
  - Ku rid saxarada la qaadayo weel nadiif ah oo engegan - waxa la isticmaali karaa weel u ka dhamaaday subagga maargarine, jalxad ama ashuun yar oo nadiif ah oo af balaadhan, ama weelka aluuminyamka ah ee lagu sameeyo keegga/doolshaha. Waxa kale oo la isticmaali karaa gobol ama qayb ah jawaan ka sameysan 'saran' oo la hoos dhigo saxanka godka musqusha si loo ururiyo saxarada. Saxarada HA KU ridin biyaha godka musqusha, ama toos ha ugu ridin weelka ururinta. Ilmaha yaryar ee aan baran isticmaalka musqusha waxa la sameyn karaa in xafaayadda (Diaper) la rogo ama waxa gudaha xafaayadda laga sareysiin karaa duubka 'saran'. Waa inaan saxarada laga soo xoqin oogada qoyaanka nuugaysa ee xafaayadda.

Magaca Baadhitaanka	Baadhitaan #/ Fure	Weel	Faalo
Clostridium difficile Toxin PCR	8288/CDI	Dhalada Leh Furka Caagga ah	Kaliya saxaradda ah biyo-biyo, jilicsanaan dhexdhexaad ah leh iyo ta jilicsan. Qaboojiye gali gudaha 24 saacadood. Ta qaboojiyaha la galiyay ku keen gudaha 5 maalmood. Hal qayb saxaro ayaa ku filan garashada. Lama aqbalayo: saxarada qaab leh ama adag, saxarada ku jirta qarsho leh maadada xafidaada, qaadisyo saxaro oo kale.
Cryptosporidium Test	6542/CRY	Dhalada Keenista ee Cary Blair	Gudaha 1 saac, ku dar saxaro ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Gali qaboojiyaha ka dib ururinta. Waa in AML loogu keeno gudaha 7 maalmood ka dib ururinta.
Culture	6562/STL	Dhalada Keenista ee Cary Blair	Gudaha 2 saac, ku dar saxaro ilaa laynka oo si wacan u walaaq. Gali qaboojiyaha ka dib ururinta. Waa in dhalada AML loogu keeno gudaha 72 saacadood ka dib ururinta. <b>Ururi hal qayb oo saxaro ah halkii maalin.</b> Fiiro: Waxa lagu taliyay 2 ilaa 3 qaybood oo lagu ururiyay dhalooyin gooni kala ah maalmo kala duwan.
Giardia Antigen	6695/GIA	Dhalada Keenista ee Cary Blair	Gudaha 1 saac, ku dar saxaro ilaa laynka oo si wacan u walaaq. Waa in dhalada qaboojiyaha la galiyay la soo gaadhsiiyo AML gudaha 7 maalmood ka dib ururinta. <b>Hal qayb ayaa ku filan garashada cudurka.</b>
Helicobacter pylori Ag	4767/HPS	Dhalada Leh Furka Caagga ah	Gudaha 1 saac, saxarada ku gali qaboojiyaha. Ku keen gudaha 72 saac. <u>Lama aqbalayo:</u> Saxarada ku jirta ku jirta maadada xafidaada, saxaro qallashay, saxaro biyo-biyo ah oo aan lahayn ama kuu yar yahay wax adag, saxaro dul saaran marisyo.

**ALLINA MEDICAL LABORATORIES -  
STOOL COLLECTION INSTRUCTIONS**

<b>Magaca Baadhitaanka</b>	<b>Baadhitaan #/ Fure</b>	<b>Weel</b>	<b>Faalo</b>
Microsporidium Stain	994/MSO	Dhalada ECOFIX	Gudaha 1 saac, ku dar saxaro ilaa laynka oo si wacan u walaaq. Ha qaboojin ee u daa heerkulka qolka. Ma jiro wakhti u go'an in lagu soo celiso AML. <b>Ururi hal qayb oo saxaro ah halkii maalin.</b>
Occult Blood, Stool	348/OBS	Weelka Kaadida ee Caagga ah	Foomka codsiga ku qor taariikhda qaadista saxarada ee dhabta ah.
Ova &Parasites (O&P)	6596/OP	Dhalada ECOFIX	Gudaha 1 saac, ku dar saxaro ilaa laynka oo si wacan u walaaq. Ha qaboojin ee u daa heerkulka qolka. Ma jiro wakhti u go'an in lagu soo celiso AML. <b>Ururi hal qayb oo saxaro ah halkii maalin.</b> Fiiro: Waxa lagu taliyay saddex qaybood oo laga baadho gooryaan, oo ururintooda ay u dhexeysay laba maalmood oo lagu riday dhalooyin kala duwan.
Rotavirus Antigen	5780/ROV	Dhalada Leh Furka Caagga ah	Gudaha 1 saac, saxarada ku gali qaboojiyaha. Ku keen gudaha 72 saac. <u>Lama aqbalayo</u> : Marisyada dabada iyo saxarada ugu horeysa ee ilmaha dhashay ama malo.
VRE (Vancomycin Resistant Enterococcus) Culture	6550/VRE	Mariska Abuurka ama Weel la Jeermi-dilay	Saxarada, marisyada dabada iyo qaybaha kale. Qaboojiyaha gali weelka jeermi-dilan gudaha 2 saac oo soo qaad isaga oo qaboojisan gudaha 24 saacadood ka dib ururinta. Marisyada ku keen heerkulka caadiga ah.
Vibrio Culture	6536/VIB	Dhalada Keenista ee Cary Blair	Gudaha 2 saac, ku dar saxaro ilaa laynka oo si fiican u walaaq. Gali qaboojiyaha oo u soo celi AML gudaha 72 saacadood ka dib ururinta. <b>Ururi hal qayb oo saxaro ah halkii maalin.</b>
Viral Culture	4726/VST	Weelka Urinta Saxarada ee MML	Keen isaga oo la qaboojiyay.
WBC-Stool	6608/WBS	Dhalada Leh Furka Caagga ah	Saxarada qaboojiyaha gali gudaha 1 saac. Waa in saxarada qaboojiyaha la galiyay lagu soo gaadhsiiyo AML gudaha 24 saacadood ka dib ururinta. <b>Ururi hal qayb oo saxaro ah halkii maalin.</b>
Yersinia Culture	6534/YER	Dhalada Keenista ee Cary Blair	Gudaha 2 saac, ku dar saxaro ilaa laynka oo si wacan u walaaq. Waa in saxarada qaboojiyaha la galiyay lagu soo gaadhsiiyo AML gudaha 24 saacadood ka dib ururinta. <b>Ururi hal qayb oo saxaro ah halkii maalin.</b>
Electrolytes , Feces	185/ELS	Weelka Urinta Saxarada ee MML - LA BARAFEEYAY	Saxaradu WAA INAY TAHAY BIYO-BIYO - HA <b>KEENIN SAXARADA QAAB LEH AMA ADAG</b>

**ALLINA MEDICAL LABORATORIES -  
STOOL COLLECTION INSTRUCTIONS**

Magaca Baadhitaanka	Baadhitaan #/ Fure	Weel	Faalo
Fecal Fat, Quantitative	316/QFF	Weelka Urinta Saxarada ee MML, LA BARAFEEYAY	Saxaradu lagu keeno heerkulka qolka waa la diidi doona, waxa la aqbalayaa ta qaboojiyaha la galiyay. Waa in bukaanku uu ku jiray cunto qaadasho ay ku jireen 100 garaam oo ah dufan halkii maalin mudo ah saddex maalmood oo ka horeysay ururinta iyo inta lagu jiro ururinta. Lama oggala calool-jilciyeyaasha (gaar ahaa saliidda macdanta ah, ama saliidda 'castor oil'). Lama oggala beddelka dufanka ee dadku sameeyay (synthetic fat substitutes) (sida Olestra) ama beddelka nafaqo ee joojiya dufanka (fat blocking nutritional substitutes). Haddii bukaanku leeyahay hawlgaal la adeegsanayo Baariyam - sug 48 saacadood ka hor ururinta. Ha ku jiro qaboojiyaha inta la ururinayo. Mudada ururinta ee UGU YAR waa 24 saacadood - 48 saacadood ilaa 72 saacadood ayaa lagu taliyay. Waxa la RABAA dhererka mudada ururinta. Weelka ku calaamadee lambar hebel (X) oo ka tirsan hebel xabo (X) isla markaan soo dir dhamaan weelka.
Occult Blood, Stool (Random or 3 Day)	348/OBS (Random) 5380/OB3 (3 Day)	Saxaro aan nidaam loo qaadin, ama saxaro aan nidaam qaadin oo ah maalmood kala duwan oo ku jirta weel ururin oo caag ah - <i>MA LEH MAADO XAFIDAAD</i>	Waxa kale oo la keeni karaa kaadhka baadhista oo lagu qoray taariikhaha ururinta. Waa in kaadhahku soo gaadhaan AML gudaha 10 maalmood - haddii ay ka badan tahay 14 maalmood, saxarada la soo qaaday waa la diidi doonaa.
Osmolality, Feces	4326/OSM	Weelka Urinta Saxarada ee MML	Waa in saxaradu tahay biyo-biyo. Saxarada qaab leh ama adag waa la diidi doonaa.
Ph, Stool	365/PHS	Dhalada Leh Furka Caagga ah, LA BARAFEEYAY	Saxarada lama aqbali karo haddii baariyam ama kaadi ku jirto.

**ALLINA MEDICAL LABORATORIES -  
STOOL COLLECTION INSTRUCTIONS**

<b>Magaca Baadhitaanka</b>	<b>Baadhitaan #/ Fure</b>	<b>Weel</b>	<b>Faalo</b>
Porphyrins, 24 Hr	994/MSO	Ururin saxaro oo ah 24 saacadood oo ku duuban warqad aluuminiyam Weelka Uurinta Saxarada ee MML	KA BADBAADI IFTIINKA. Qayb saxaro oo aan nidaam loo qaadin waa la diidi doonaa & waana in saxarada la keenayo miisaankeedu yahay ugu yaraan 100 garaam. Waxa la rabaa dherereka mudada ururinta. Waa in bukaanku uu joojiyay dhamaan dawooyinka, haddii ay suurtoagal tahay, ugu yaraan hal todobaad. Haddii caafimaad ahaan aanay haboonayn in la joojiyo dawooyinka, soo raaci liiska dawooyinka marka aad keenaysid saxarada. Waa in bukaanka loo sheego inuu iska dhaafo hilibka cas mudo ah 3 maalmood ka hor ururinta saxarada. Waa in la cadeeyo in taas la yeelay ama aan la yeelin.
Reducing Substances	312/RSS	Dhalada Leh Furka Caagga ah , LA BARAFEEYAY	Saxarada adag iyo saxarada laga soo ururiyay xafaayad (diaper) ama lagu daray maado xafidaad waa la diidi doonaa.